# Qofka Ilaahay la kulma isagoon cidna ugu shariig yeelin Janaduu galayaa, qofkase Ilaahay la kulma isagoo u shariig yeelay Naartuu gelayaa

Jaabir Binu Cabdulaahi Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Qofka Ilaahay la kulma isagoon cidna ugu shariig yeelin Janaduu galayaa, qofkase Ilaahay la kulma isagoo u shariig yeelay Naartuu gelayaa".
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay Qofka dhinta isagoo aan Ilaahay cidna ugu shariig yeelin wuxuu ku dambaynayaa Janada, xataa hadiiba loo cadaabo dabmiyo uu galay, qofkase dhinta isagoo u shariig yeelaya Ilaahay kaasi Naarta ayuu ku waarayaa.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3418